# GOLAHA WAKIILADA JSL

## WAAXDA HADAL-QORAALKA, GUDIYADA IYO GOLAWAYNAHA

**Kal-fadhigii 37^aad^ fadhigii 2^aad^**

**07/07/2018**

**Quraanka: -** Md. Xuseen Ismaaciil Yuusuf

**Gudoonka: -** Gudoomiye Md. Dr. Cali Yuusuf

**Ajandaha Fadhiga:-**

- Doodda Ajandaha kal-fadhiga 37aad

**Gudoomiyaha: -** Mudanayaasha doonaya inay ka qaybgalaan Doodda Ajandaha kal-fadhiga 37aad ha is qoreen.

**Md. Cabdiraxmaan Yuusuf Cartan: -** shirgudoonka iyo mudanayaashaba waan salaamayaa, Ajandaha shuruuc badan oo muhiim ah ayaa ku qoran, laakiin sida ay mudnaanta u kala leeyihiin uma taxna ama muhiimada deg-dega ah ee ay inoo leeyihiin uma qorna. Mida kale waxaa uu wadanku iskaga jiro waan wada ognahay oo siyaasi ahaan iyo amni ahaanba mar xalad ayuu marayaa, waxaana fiican maadaama oo aynu nahay golaha wakiilada in aan wax iska nidhaa ayaa fiican, rayigaa xildhibaanku soo jeediyaya ee ahaa xildhibaanada Somaliland taageerayna rayi wanaagsan weeyi.

Waxa aynu nahay gole siyaasiya, dadkana wakiil ayaynu ka nahay waxaana wanaagsan in aan wax iska weydiino inta aynaan galin xeerarka caadiga ah ayaa ila haboon oo dadkii ina soo doortay aan xaaladooda wax ka nidhaahno qodobkaasi mid loo baahanyahay waana mid aan soo jeedinayo in ajandaha lagu soo daro.

Qodobka kale ee aan doonayo in aan wax ka idhaa waa Ajandaha iyo sida uu u kala mihiimsanyahay waxaanan ugu soo horaysiin lahaa xeerka Guud ee Doorashooyinka Qaranka iyo Diwaan galinta Codbixiyayaasha xeerkaas oo iskugu jira Baarlamanka, Golaha Deegaanka iyo diwaan galinta oo hal xeer iskugu jira xeerkaasi meel dhexe ayuu ku jiraa waa in loogu soo horaysiiyaa.

Xeerka kale oo isna khuseeya doorashooyinka ee isna halkan ku jiraa waxaa weeyi Xeerka ismaamulka Gobolada iyo degmooyinka xeerkaasina waa in uu xaga hore yimaadaa. Hadii xeerar aan muhiim ahayn aan soo horaysiino waxay keenaysaa in xeerarkaa muhiimka ahi dib inooga dhacaan. Xeerka kale ee aan runtii ka waayay ajandaha xeerkii ka ganacsiga Baananka oo qaranka muhiim u ah, halka ay ka buuxaan ajandaha xeerarka xawaaladaha iyo xeerka maydhista lacagta isaga oo uu maqan yahay xeerkii Baananku,

markaa waxaan soo jeedinayaa in uu xeerkaasi soo noqdo, maadaama oo xeerkaa laga dooday haba la diidee waa in uu xeerkaasi ku soo noqdaa ajandaha, marka uu xeerkaasi meel maro ayay imanayaan kuwan kalana waad mahadsantihiin intaa ayaan soo jeedinayaa.

**Soo Jeedin: -**

- Waa in ajandaha lagu soo daraa Xog-ogaal noqoshada Xaalada dalka.
- Waa in xeerka Doorashoonka laga dhigaa qodobka 2aad ee ajandaha.
- Xeerka Ismaamulka Gobolada iyo Degmooyinkuna waa inuu xaga hore la keeno
- 3. Waa in ajandaha lagu soo celiyaa Xeerka ka ganacsiga Baananka

**Md. Axmed Maxamed Nuur:-** shirgudoonka iyo mudanayaashaba, marti sharafta iyo saxaafadaba waan salaamayaa, waxaa ugu horeeya xishaab xidhada 2016-2017 sida aan ognahay waxaa jiray xisaab xidho ka horeeyay oo fadhihii hore la inoo keenay oo aynu u yeedhnay hanti-dhawraha guud ee qaranka oo uu inoo sheegay in aan xisaabaha qaar aan loo hayn wax raad-raaca mudanayaal maadaamo oo aan ku wii horaba loo hayn wax raadraaca oo xukuumad cusibi markay timaadba dib la inoogu soo celinayo loona baahnaa in xukuumadu joogtay lala xisaabtamo waa arin aan Meesha qabanayn, oo aan kuwii umada dhacay aan la soo qabanayn sharcigana aan laga soo celinayn sharcigana aan la gaynayn anigu fikriyan waan ka saarayaa ajandaha oo waxaan lanbarka koowaad ka dhigayaa xeerka doorashooyinka iyo diwaan galinta sababta oo ah waxaa dadlka ku soo socda doorashooyin, mana aha in dadka la inagu soo jeediyo oo la yidhaa Golaha ayaa wax walba hortaagan maaha, markaa waxaan leeyahay xeerkaa waa in aan wakhti dheeraada u helaa xeerkaa.

Waxaa kale oo aan leeyahay sidii saami qaybsi loo samayn laa sida igu maqaalo ah in xukuumadu soo gudbisay shirgudoonka in ay mudanayaasha u soo gudbiyaana waan soo jeedinayaa, waxaa kale oo aan qodobka labaad ka dhigayaa xeerka Ismaamulka Gobolada iyo Degmooyinka xeerkaas oo ah xeer muhiim ah, waxaa kale oo aan qodobka 3aad ka dhigayaa xeerka ilaalada xeebaha Somaliland oo ah ciidan dhisan walina aan loo samayn wax xeer ah waxaan ku xigsiin lahaa xeerka kaluumaysiga oo aan ka dhigi laha qodobka 4aad, ka 5aad waxaan ka dhigi lahaa xeerka Shaqaalaha Baarlamaanka, 6aadna waxaan ka dhigayaa

Xeerka wadooyinka xeerkaas oo ah xeer muhiim ah, wadooyinkeenuna way rabasha badanyihiin oo dhibaatooyin badan ayaa ka dhaca, intaas ayaan kaga baxayaa waad mahadsantihiin.

**Soo jeedin: -**

- Waa in ajandaha laga saaraa Xisaab xidhada 2016 iyo 2017 iyada oo aan lahayn kuwii ka horeeyayba.
- Qodobka 1aad waxaan ka dhigayaa xeerka guud eedorashooyinka.
- Qodobka 2aad waxaan ka dhigayaa Xeerka ismaamulka Gobolada iyo Degmooyinka.
- qodobka 3aad ka dhigayaa xeerka ilaalada xeebaha Somaliland
- qodobka 4aad waxaan ka dhigi lahaa xeerka kaluumaysiga
- Qodobka 4aad waxaan ka dhigi lahaa Xeerka Shaqaalaha Baarlamaanka.
- Qodobka 6aad waxaan ka dhigi laha xeerka wadoonyinka.

**Md. Cabdilaahi Ismaaciil Faarax: -** Gudoomiye marka ugu horaysa waxaan taageerayaa labadii xildhibaan ee iga horeeyay qodobadii ay ka hadleen waan soo dhawaynayaa, waxaan si gaar ah u soo dhaweynayaa xildhibaan Cabdiraxmaan oo qodobadii aan ka hadal islahaa ka hadlay oo ay ka mid tahay ta doorashooyinka iyo ta baananku ba iyo xildhibaan Axmedba.

Waxaan intaa ku darayaa sida aad la socotaan xaalada dalku halka uu marayo waad la socotaan inaga oo ah golihii wakiilada, hadii ay noqon lahay colaada dibada, colaada gudaha iyo cumuq-cumaqda kale ee somalialand-ba. Afkii biyaa inooga buuxee waa in aan ka hadalnaa xaalada dalka oo Ajandaha lagu soo daraa ajandaha hadii kale sidaan u daawanayno ayuu qarankani inagu dumayaa waa in aan muhiimad gaara siinaa arintaa, ta kale waxaan qabaa in ajandaha sida ay u kala mihiimsanyihiin loo soo kala horumariyo ayaan soo jeedinayaa waanad mahadsantihiin.

**Soo Jeedin: -**

- Waa in ajandaha lagu soo daraa Xog-ogaal noqoshada Xaalada dalka.
- Ajandahana waa in loo kala horaysiiyaa siduu u kala mihiimsanyahay.

**Md. Siciid Cartan Cusmaan:-** shirgudoonka iyo mudanayaashaba, marti sharafta iyo saxaafadaba dhamaan waad salaamantihiin:- hadii aan dooda u baxo inta badan waxaan ku raacsanahay Ragii iga horeeyay qodobadii ay taabteen ayaan ku raacdanahay, hadii aan ajandaha kala horumariyo qodobadiisa mihiimka ah Qiimaynta xaalada dalku waxay soo gaadhay xiligii laha hadli lahaa ama la qiimayn lahaa baryahan danbana waxaa muuqata in ay aad u sii rifmayso nabadgalyadeenii, waxa ugu badan ee aan ku faani jirnayna waa nabadgalyada, maanta halka ay maraysana waan wada arkaynaa xili laga aamuso ama cid lagu eegana ma taagna, markaa waxaan ku raacsanahay inta aynaan lacag maydhis iyo qashin aynaan ku mashquulin waa in amnigii yaraa ee aan ku joognay uu aad iyo aad u sii liciifayo.

Qodobka 2aad waxaan ka dhigi lahaa in xeerarku sida ay u soo kala horeeyaan waayo waxaan leenahay xeer-hoosaad ee maaha in shirgudoonka iyo xog-hayntu siday doonaan u soo qoraan maahee waa in nidaamka la raacaa weeyaan, qodobkaa la geeyay 10aad sidii ay shirgudoonku lugta u sii jiidayeen ayaa laga rawaxay maantana halkaa ayaa la geeyay taasi aqbali maynee waxaan leeyahay waa in 2aad laga dhigaa.

Ta 3aad waxaa weeyi qodob mihiim ah oo uu ka hadlay cabdiraxmaan cartan, dalku waxaa uu u xidhanyahay sadex qof oo hadaan bangi ganacsi aan la helina dadlku dhibaatada in haysata ka bixi maayo, oo dalka shaqo la'aan ayaa ka jirto oo bangi aad LC aad ka furataa ma jiro, oo xeerkii baanku uu u xidhnaado inamo yar yar oo haysta baanan yar yar iyo isgaadhsii dalku u xidhnaan maayo, sida aanu ka gudi ahaan u yeedhnay gudoomiyaha baanka waxaa uu noo sheegay in xeerkaasi wax badan inagag fadhiyo oo la aantiina wax macaamilo ah oo la inala yeelanayaa aanay jirin, marka waxaa leeyahay xeerkaa baananka waa in lagu soo daraa oo 4aad laga dhigaa waayo waxyaabo badan ayaa inaga xidhan waanan ka baxay.

**Soo Jeedin: -**

- Waa in ajandaha lagu soo daraa Xog-ogaal noqoshada Xaalada dalka oo qodobka 1aad laga dhigaa
- Waa in xeerarka loo soo kala horaysiiyo sida ay u kala muhiimsanyihiin sida uu sheegayo xeer-hoosaadka Golaha wakiiladu.
- Waa in xeerarka mooshinka lagu keenay loogu soo horaysiiyaa
- Waa in ajandaha lagu soo daraa Xeerka ka ganacsiga Baananka

**Md. Cabdiraxmaan Maxamed Jamac (Aw xoog): -**shirgudoonka iyo mudanayaashaba waan salaamayaa, bacda salaam anigu waxaan ka hadlayaa qodob aanay cidi ka hadal oo in badan aan ka shaqaynayay ama aan af-hayeen u ahaa waxaa ugu horayn soo jeedinayaa in gabi ahaanba laga saaro ajandaha qodobka 4aad oo ah xeerka Saxaafada waanan sababaynayaa, maan garan sababta loogu soo daray maadaama oo uu dhaqan galay madaxweynuhuna saxeexay 2004-tii waana xeer dhamaystiran, hase yeeshee labadii xukuumadood ee xisbiga kulmiye ee u kala danbeeyay dalkani way iska indho tireen ku dhaqanka xeerkan waxayna ku tunteen xuquuqda Saxafiga oo ay ahayd in xeerkani uu dhawro.

Markaa xeerkani waxaa dabada looga riixayaa in la saaro culaysyo dheeraad ah saxafiyiinta iyo saxaafada, xeerkuna uu dhawrao xuquuqda muwaadinka iyo saxafigaba, tusaale ahaan hadii uu saxafigu uu galo dil waa in lala tiigsadaa kiis madani ah ee aan lagu soo eedayn kiis criminal ah sida uu xeerku qorayo. Sida dhacda iyada oo uu xeerkani uu yaalo oo aan lagu dhaqmin saxafiyiintana lala tiigsado xeer criminal ah laguna xukumo ciqaab dheer. Xeerkana wuu yaalaa oo waxaa haya gudida aan gudoomiye ku

xigeenka ka ahay markaa waxaan leeyahay waa in xeerkan la dhaqan galiyaa, shirgudoonkana waxaan leeyahay waa in ayna mar danbe ku soo darin ajandaha.

Qodobka kale ee Xeerka Xawaaladaha sababta aad ugu soo darteen maxay tahay iyada oo uu maqan yahay xeerkii maamuli lahaa xawaaladaha oo ah xeerkii ka ganacsiga Baananku kaas oo laga dooday codayna u taagnaa in ajandaha laga waayaana waa ayaandaro, waxaanan soo jeedinayaa in xeerkaa la soo celiyo xawaaladaha iyo maydhistu ha inoo danbeeyaane.

Waxaan aad u taageerayaa xildhibaanadii iga horeeyay ee soo jeediyay in qiimaynta xaalada dalka laga dhigo qodobka 1aad waayo waxaynu nahay gole ka wakiilada shacabka waxaynu nahay gole siyaasadeed oo hadii aan eego xaalada arimaha dibadu waa mid sii diciifaysa aniga oo taageeraya war murtiyeedna ka soo saari doona xildhibaanadaa taageeray Somaliland ee egiriiska ah waana kuwii aan la shaqayn jirnay markaan ahayn gudida arimaha dibada iyaga oo ahaa 40 mudane hadana ay ka soo hadheen 8daa mudane.

Markaa waxaan leeyahay waa in qiimaynta xaalada oo dhanwalba ah in aan ka hadal oo xeerarkan caadiga ah ee golaha aynaan sii wadin ee aan ka horaysiino xaalada dalka. Sidoo kale waa in la siiyaa mudnaanta uu leeyahay xeerka ismaamulka gobolada iyo degmooyinka oo ah xeer muhiim ah oo dalka kala xadaynaya waa in la sameeyaa xeerkaa marka kaasi dhamaado ayaa saami qaysiguna imanayaa waad mahadsantihiin.

**Soo Jeedin: -**

- Waa in gabi ahaanba laga saaraa Ajandaha Xeerka Saxaafada.
- Waa in laga saaraa ajandaha xeerka xawaaladaha.
- Waa in ajandaha lagu soo daraa xeerka ka ganacsiga Baananka.
- Waa in ajandaha lagu soo daraa Xog-ogaal noqoshada Xaalada dalka lagana dhigo qodobka 1aad.

**Md. Xaamud Cismaan Cigaal:-** shirgudoonka iyo mudanayaashaba waan salaamayaa, marka hore waxaan u mahad naqayaa mudanayaasha taageeray soo jeedintaydii ahay in la taageeri mudanayaasha taadeeray Somaliland ee Engiriiska, ajandaha markaan u soo noqodo waxaan ku raacsanahay saaxiibkay Axmed in laga saaro qodobka 1aad ee xisaab xidhaka waayo wax uu ku fadhiyaa ma jirto, waxaa kale oo aan doonayaa in aan ku soo daro in badana waan ka hadlay, Golahan Sharci dajirta ee aynu fadhino ma laha wixii lagu maamulayay mana arag cid ahysata oo hadii uu nin xil-dhibaan ahi uu danbi galo wax lagu cigaaqabaa ma jirto markaa waxaan leeyahay waa in xeer hoosaadkii golaha la keenaa oo qodobka 1aad laga dhigaa ayaan soo jeedinayaa.

Waxaa kale oo jira mudanayaal ka hadlay laba mashruuc oo aan halkan ku jirin oo midi yahay Xeerka Baananka oo la inoo keenay dhawr jeerna laga hadlay ama laga dooday xeerkaasina waxa uu ka soo horjeedaa diinta oo waxaa ku jirta ribo xeerkaasina socon maayo hadii lagu soo daro ajandaha taasi taa weeyi xeerka kootada iyo wax sheegayana maynaan arag isagana waxaan leeyahay xaga hore la keeni maayo waad mahadsantihiin.

**Soo Jeedin: -**

- Waa in Ajandaha Laga saaraa Xisaab xidhadha 2016 iyo 2917.
- Waa in Ajandaha lagu soo daraa Xeer-hoosaadka Golaha wakiilada.
- Waa in aan ajandaha lagu soo darin Xeerka ka ganacsiga Baananka.

**Md. Maxamed Saalax Cige-** shirgudoonka, mudanayaasha, shaqaalaha iyo saxaafadaba waan salaamayaa, run ahaantii waan ugu mahad celinayaa shirgudoonka Ajandaha 37aad ee ay inoo soo diyaariyeen oo ay ku jiraan xeerar aad u mihiim ahi, sidoo kale waxaan taageerayaa mudanayaashii iga horeeyay ee soo jeediyay in ajandaha lagu soo dararo qiimaynta xaalada guud ee dalka oo sidii ay ahaan jirtay laga dhigo farqada 1aad ayaan soo jeedinayaa qodobka 4aad ee xeerka saxaafada oo ah awooda afraad ee dalku leeyahay in faro galin iyo culays lagu sameeyaana ma banaana, maadaama oo qaranka xil culus u hayaan, waxaana jiray xeer aan hore u ansixinay una baahan in la dhaqan galiyo, waana dhibaatooyinka ina haysta oo inta aan xeerarka halkan ka ansixino ayaa laga tagaa oo cidlo la iska dhigaa.

Xeerkaa saxaafadu waxaa uu ka mid yahay xeerarka aanay maxkamadaha iyo xeer-ilaalintuba aanay dhaqan galin oo aanay ku shaqay maanta hadii uu qof saxafi ahi uu danbai galo inta meel la iska dhigo xeerka saxaafasa ayaa inta meel la iska ayaan waxaa lala doontaa xeerka Ciqaabta guur oo sharci daro ah oo xukunka kasoo baxaa aanu ahayn mid cadaalada ku dhisan waayo xeer saxaafadeed ayaa yaala. Waxanan soo jeedinayaa in laga saaro xeerka saxaafada ajandaha loona daayo xeerkii ay saxaafada lahay.

Qodobka labaad ee aan ku darayaa waxa uu yahay xeerarka halkan inoogu qorani waa xeerar badan oo xeerarku sida ay yihiin waa mar akhriska 1aad ay ku jiraan oo gudiyadu gacanta ku hayaa marnaa waa mar ay marayaan akhriskii 2aad oo gale waynahay ay horyaalaan xeerarkana waxaad moodaa in wali gudiyada horyaalaan oo aanay ka soo dhamaan, markaa waxaan odhan lahaa in sida ay u kala mihiinsanyihiin loo soo kala horaysiiyo una baahan in golaha uun loo qaybiyo inta la soo taxo, waxaanad moodaa in aanay marayn siduu procedure ku ahaa in aanay maray.

Qodobka sadexaad ee aan ku darayaa waxa uu yahay xeerar ayaa halkan ku jira oo u baahan in dib loo sameeyo tusaale ahaan Xeerka maydhista lacagta oo aan soo jeedinayo

in Meesha laga saaro waayo baahi weyn oo maanta xeerkaa loo qabaa ma jirto ama baahi ay bulshadeenu u qabtaaba ma jirto.

Ma jiro xeer golahan ka baxay oo la yidhaa xeerka Guud ee doorashooyinka Qaranka iyo Diwaan galinta Codbixiyayaasha, waxaa jira oo galaha ka baxay xeer Lr. 23 oo golahan ka baxay laguna dhaqmo markaa kalmada ah xeer ka Guud Meesha waan kasaari lahaa oo hadii xeerkii hore wax kabel lagu samaynayo hala cadeeyo hadii uu yahay xeer gaara oo la soo sameeyayna ha la cadeeyo.

Xeerarbadan oo halkan ku jirana oo golaha hore looga ansixiyay ama qaybo ka mid ah la ansixiyay ayaa jira sida Qabyo qoraalka xeerka hay'ada wadooyinka oo aan asxinay oo aanay laba xeer oo isbarbarsocda aanay noqane wax kabedel lagu sameeyo oo hay'adana la soo galiyo, waxaa kale oo jira laba xeer oo maashin lagu keenay oo ahaa Xeerka kaluumaysiga iyo xeerka ismaamulka Gobolada iyo degmooyinka, waxaan odhan lahaa kuwaasina xiligii mooshinka weydhaafeen ayaan odhan lahaa waad mahadsantihin.

**Soo Jeedin: -**

- Waa in ajandaha lagu soo daraa Xog-ogaal noqoshada Xaalada dalka.
- Waa in ajandaha laga saaraa xeerka saxaafada.
- Waa in xeerarku ay maraan procedure-ka loo qoraa sida ay u kala mihiimsanyihin oo igaga oo gudida yaala la keenin Gole weynaha.
- Waa in laga saaraa Xeerka guud ee doorashooyinka Qaranka iyo Diwaan galinta cod bixiyayaasha waayo maaha xeer hore uga baxay golaha oo wax ka bedel lagu samaynayo.

**Md. Cabdi Maxamuud Jaamac: -** Ragii iga horeeyay aad ayaan u ayidayaa waxyaanaha ay yidhaahdeen waxaaanan toos u galayaa sidaan Ajandaha u soo kala horaysiin lahaa: -**Soo jeedin: -**

- Xeerka ismaamulka gobolada iyo Degmooyinka waxaan ka dhigayaa Qodobka 2aad,
- Xeerka ilaalada xeebaha 3aad ayaan ka dhigayaa.
- Xeerka kaluumaysigana 4aad ayaan ka dhigayaa

**Mrw. Baar Siciid Faarax:-** waan salaamayaa shirgudoonka, saxaafada iyo marti sharaftaba waan salaamayaa, ajandaha waxaa qoran 15qodob waxaan ka soo reebay 8qodob oo aan u arkay in ay yihiin kuwa ugu muhiimsan oo ah sidan:-Qodobka 1aad waxaan ka dhigayaa Xog-ogaal u noqoshada xaalada Delka, sida aad ka war haysaa waxaa jira shaqaaqooyin dalka gudihiisa iyo dibadiisaba ah waxaanan filayay in goluhu

arinkaa ka hadlo oo uu ka soo jeediyo sir-saxaafadeed, waxaanan soo jeedinayaa in goluhu si degdeg ah uga hadlaa uuna baaq u soo saaraa.

Qodobka 2aad xeerka maaraynta qashinka ayaan ka dhigayaa**.** Sida aad la wada socodtaan maalada koone walba waxaa yaala qashin oo waxaan filayaa in aad tagtaane huteelada duqsigii waaweynaa ayaa bow-leh oo cuntada ayuu ku dhacayaa oo xaalada dalka khatar ayay ku jirtaa waxanad moodaa in aanu gole deegaan ka jirin magaalada Hargeisa, waxaanan soo jeedinayaa in Ugu horayn loo yeedho maayinka caasimada waxaan tagay shalay xaafada la yidhaa bada cas waxaanu qashinku yaalaa kiiloo mitiro(km) oo magaalada markaad eegto qashinka kii qoyanaa iyo kii qalalaaba wey is dhex yaalaan, caruuraha magaaladana shuban ayaa ku jira uu sababay khasinkaasi.

Qodobka 3aad waxaan ka dhigi lahaa xeerka doorashooyin oo aan ahay kan imika ku jira ahandaha, sida igu maqaalaha ah waxa uu madaxweynuhu soo gudbiyay xeer loogu samaynayo dumarka iyo dadka kale ee dulman waa in wixii ingau waajiba goluhu ka gutaa arintaa waayo dumarku waxay ka mid yihiin dadka ugu tirada badan mana aha mid la iska idho tiri karo, waxaan ka maqlayay rag halkan jooga dumarku ayaanay iman golaha iyo ha isku codeeyeen marka ay doorasho timaadana waxaa la leeyahay reer hebel hadii aynu nahay ayaan la inaga badan ayaa la leeyahay marka dumarka kooto ha loo xidho la yidhaana waxaa la leeyahay xaq uma laha ee wey badanyihiine ha isku codeeyaan.

Qodobka 4aad waxaan ka dhigayaa Xeerka Shaqaalaha Golaha Baarlamaanka, shaaqluhuna waa dadkaa habeen iyo maalin taagan ee xataa marka goluhu fasaxa yahay igu aan fasaxa galin ee ay ku sugan yihiin Xarunta Golayaasha markaa waa in ay xaquuq helaan waanan soo dhaweynayaa.

Qodobka 5aad waxaan ka dhigayaa Xeerka ilaalada Xeebaha, xeeb dheer ayaynu leenahay marka aad martana inteeda ugu badani waa cidlo waana in xeerkaa la dhamaystiraa inta aan ku jirno kal-fadhigan 37aad.

Qodobka 6aad waxaan ka dhigayaa xeerka kaluumaysiga, sida aad ka warqabtaa dadkeena xoolihii way ka dhamaadeen, waxaanan madaxweynaha u soo jeedinayaa in Wasaaradii kaluumaysiga la soo Celiyo sababta oo ah bad ayaynu leenahay kaluun faro badan ayaa ku jira ajaanid ayaana gurta, maadaamo oo xeelihii dhamaadeen waxay ahayd in kaluumaysiga la xoojiyo iyo beeraha.

Qodobka 7aad Xisaaab xidhada 2016 iyo 2017 in halkan lagu soo daraa waa ceeb waayo waa in la keenaa kuwii ka horeeyay ayaa maqan waxanan golaha u soo jeedinayaa in kuwii hore haday sibiq inagau dhaafeen in waajibaadka inaga saaran aan ka gudano.

Qodobka 8aad waxaanka dhigayaa xeerka wadooyinka, waayo wadooyinkeenu aad ayay u burbursanyihiin oo qofkii meel kale inooga yimaadaa waxa uu yidhaa miyaydaan

waxba haysan maxaad wadooyinka u hagaajisan weydeen, markaa waa in xeerkaa laga shaqeeyo. Waanad mahadsantihiin.

**Soo Jeedin: -**

- Waa in goluhu si degdeg ah uga hadlaa Shaqaaqooyinka Gudaha iyo dibada ee dalka kajira uuna baaq u soo saaraa.
- Waa in ugu horayn loo yeedho maayinka caasimada si uu uga warbixin qashinka maalada aafeeyay.
- Qodobka 1aad waa in ajandaha lagu soo daraa Xog-ogaal noqoshada Xaalada dalka.
- Qodobka 2aad xeerka maaraynta qashinka.
- Qodobka 3aad xeerka doorashooyin
- Qodobka 4aad Xeerka Shaqaalaha Golaha Baarlamaanka.
- Waa in laga saaro ajandaha xisaab xidhada 2016 iyo 2017-ka
- Qodobka 8aad Xeerka Hay'ada Wadooyinka.

**Gudoomiye Cali Yusuf sixid: -** mudanayaal xeerka doorashooyin waxaad moodaa in aanu halkan ugu qornay sidii ugu haboonayn, markaa waxaan u bixin doonaa magaca ku haboon maadaamo aay inagu soo socdaan doorashooyin badani oo ay ka midyihiin Golaha wakiilada, Saami qaybsiga iyo kuwo kale markaa hadii aanu ku haboonayn sidan magaca waynu badali karnaa insha allaah.

**Md. Maxamed Cali Xirs (Obama):-** Gudoomiye waad-mahadsan tahay, Xildhibaanada hadlayna dhamaantooda way mahadsanyihiin, gudoomiye ajanduhu sidaan u arkayo waa 15 qodob, waynu wada ognahay inaynaan dhamaynayn 15 qodob, waxaa fiicnaan lahayd inaynu koobno oo Xeerarka diyaarka ah mar walba horaysiino, Anigu Ajandaha sida Golaha u dejiyo ma fahmin wayo waxaa jira Xeerar ku jiray ajandihii hore oo aan laga gaadhsiin inaynu iminka u horeysiino ayayna ahayd, waxaa jira Xeerar badan oo ajandahaa hore ku jiray kana aan ku jirin tusaale Xeerkii Bangiyada Ganacsiga miyaa la laalay Xeerkaas, ma far baa loo taagay oo waa la diiday, taas oo kale waa khaladaadka ka jira Golaha xeer aan la dhamaystirin oo go'aan aanu ka gaadhin waxay ahayd inuu mar walba Ajanda xiga xaga hore kaga jiro ayaan qabaa.

Waxa kale khaladaadka jira ka mid ah Xeerar badan oo akhriska 1aad iyo akhriska 2aad ku jira ayaa mooshin ku qoran yahay, Mooshinka sharcigiisa waynu naqaan oo hadii uu Mooshin yahay ajandaha ma galo waayo waa wax 24 saacadood lagu dhameeyo markaa waxaan odhan lahaa halkaa saxa oo mooshin iyo Xeerar ha is-dhex dhigina haduu yaalo oo la ilduufay ama aan laga gaadhsiin waxay ahayd in uu xaga hore ka soo galo, markaa taasna waxayd in mooshinku ugu horeeyo oo isagu noqdo waxa ugu horeeyo go'aan laga gaadhayo wax ka badalka Xeerka Kaluumaysiga oo qodobka 15 lagu qoray, sidoo kale

mooshinka kale ee Wax ka badalka Xeerka Ismaamulka G. iyo Degmooyinka oo isna 10 ku qoran taasina waa Xeer-hoosaad jabin uu Goluhu sameeyay markaa waa in la saxaa inagoo Xeer-dejin ah inaynu wax khaladnaa waa khalad wayn.

Hadaan eego Ajandaha sidaynu u soo kala horeysiinayno:-

**Xeerarka Doorashooyinka** magaca uu doono ha yeeshee waxaan qabaa inaynu shaqada ugu horeysa ka dhigno weeye maadaama wadanka doorashooyin badan ku soo wajahan yihiin oo waxa inoo hadhayna ay tahay wakhti yar oo 9 bilood ka yar, markaa waa in Xeerarkaasi aanay Golaha ku daahin oo Golaha shacabka iyo Qarankuba u arko inaynu kow ka nahay oo aynu ku hogaaminayno doorasho inay dhacdo oo aan la inoo arag wax dib u dhigaya oo dood galinaya oo ajandahana xaga dambe dhigaya, danta Golaha iyo danta qaranka ku jirta wakhtiguu doono ha dhamaadee inagu hawsooda aynu galno, Xeerarkaasi sida Maxamed Saalax sheegay maaha kuwo cusube waa kuwo Golaha yaal oo hore u jiray, waxa ugu adag ee la sameynayaa waa saami qaybsiga, saami-qaybsiguna waa qod ka mid ah qodobada Xeerka oo u baahan inaynu guda galno oo dhamaystirno.

**Wax ka badalka Xeerka Gobolada iyo Degmooyinka** isaga ugu horeeya mar haduu mooshin yahay, Gobolada iyo Degmooyinka iyaguna waxay ka mid yihiin Xeerarka marka doorashooyinka la galayo wax kaga xidhan yihiin sida Golayaasha Deegaanka, iyaguna si ay ula jaanqadaan doorashooyinka inaynu dhamaystirno waa muhiim maadaama siyaabo badan ay isug xidhan yihiin oo ajandaha labadaas qodob kow iyo labo ka dhigano kow iyo labo.

**Xeerka Bangiyada Ganacsiga** oo ku jiray Ajandayaashii hore halkan kuma arko waxaana anigu arkaa ceeb iyo dambi wayn in xeer intaas oo dhan ku jiray ajandaha in iyadoon go'aan laga gaadhin in la waayo, shir-gudoon ha noqdeen ama shaqaale ha noqdeene in la waayo oo laga saaro waa ceeb wayn, wixii ku jiraba Xeerkaas waa in go'aan laga gaadho, hadii ribo ku jirto oo uu xaaraan yahay inaynu cod u qaadno oo diidno waa shaqada Golahan, hadii danta qaranku ku jirona inaynu ansixino weeye, aduunyada waxaa jira Bangiyada gaalada oo dhami bangi sida Islaamka u shaqeeya ayaa jira iyagoo gaalo ah inaynu ku amarno oo Bangiyada gaalada ku khasabno inay Islamic ku shaqeeyaan wax inoo diidaya ma jiraan, waxayna mid noqon doonta dooda Golaha.

**Xeerarka Shidaalka iyo Macdanta** oo kala ah Xeerka Macdanta, Xeerka sahminta Shidaalka iyo Xeerka Dakhliga Shidaalka saddexdaas xeerba waa macdanta iyo shidaalka iyo soo saaristiisa waana Xeerar muhiima inaynu xaga hore ku darno, waxaa saadalinayaa oo shirkadihii shidaalku sheegeen in 2019 la wadanka laga qodayo oo la soo saarayo shidaalka insha'alah markaa yaanay xeerarkaasi inagu raagin sidii loo qaybsanayay, sidii wax loo wada cunayay iyo sidii Somaliland wax noqonaysay iyo sida kuwa soo saaraya wax ugu lahaan lahaayeenba waa inaynu xeerarkaas dedejino oo ka shaqayno.

Xeerka Kaluumaysiga iyo Goboladu waa mooshin Iyana xaga hore ugu horeeyaan, waxaa Iyana muhiima Xeerka Saxaafada hadii uu jiro oo wax laga badalayo iyo hadii kale waa loo baahan yahay.

Waxaan ku dari lahaa oo aan ku jirin meesha waa inagu ceeb oo waxaynu nahay laba gole oo wada shaqeeya oo Xeerarku maraan 12 sano ma lihin wada shaqayn dhab ah wax xeer oo lagu wada shaqeeyona ma lihin dhowr jeer waa la isku dayay xeer-hoosaad laakiin waxba kama soo bixin, markaa Xeerka Baarlamaanka in lagu daro ajandaha madaama wakhti yar inoo hadhsan yahay inaynu umada iyo qaranka dhaxal uga tagno iyo wax sax oo ay kuwada shaqeeyaan.

Waxaan ku soo koobayaa 7 xeer inaga badan maysee sidaas aynu u soo kala horeysiino, Xeerka muhiimka ah ee Baar ka hadasahay ee kootada iyo saami-qaybisiga oo meeshaynu kaga darayno aanayn garanayn, anigu waxaan qabaa in dib u dhigano laakiin ajandaha xaga hore kaga darno si aan la inoogu arag dad dib u dhigaya oo doorashada dib u dhac ku keenaya.

**Md. Siciid Warsame Ismaaciil:-** Shir-gudoonka, Xildhibaanada sharafta leh iyo Saxaafada waxaan ku salaamayaa salaanta Islaamka ASC, salaam ka dib, waxaan ragii hore ku raacsanahay qodobka ah qiimeynta xaalada dalka hadii aynu nidhaahno maalin walba hadal baynu wadaynaa gureeguna saqafka ka dumayo dee weheenu waa biyo col dhaanshay, markaa xaaladii wadanku meel xun bay maraysaaye waan ku raacsanahay xildhibaanadii iga horeeyay qodobkaas in lagu daro Ajandaha.

Waxa kale oo aan rabaa inaan halkan ka cadeeyo ama aan idinka saxo halkan waxaa ku qoran Xeerka Maaraynta Qashinka, sida ajandeheena loo sameeyo waxaad moodaa in wax ka si yihiin oo wax taariikh soo soconayay oo meel la tixraacay maaha, Xeerkaas Maaraynta Qashinku maaha mid akhriskii labaad maraya ee wuxuu sugayaa codayn doodiisiina way dhamaatay maalintii u dambeysay iyadoo loo codayn lahaa baa kooram la waayay sidii baana fasax lagu galay, maantana waxaa lagu soo qoray inuu akhriskii labaad marayo waa wax lala yaabo, waxaad u arkaysaa in waxeenu tixraac lahayn.

Sida Maxamed Cali sheegay waxaynu leenahay Xeer-hoosaad aynu raacno Xeerka Goboladu waa mooshin xeer lagu keenay mooshinkua waa inuu u soo horeeyaa, marka Xeerkaas mooshin baa lagu keenay Gudi baana laga sugayaaye ha loogu horeeysiiyo, sidoo kale Wax ka badalka Xeerka Kaluumaysiga isna mooshin baa lagu keenay ka sedexaad aynu ka dhigno,

Xeerka Saxaafada mar hadii Gudidii tidhi anagu ma keenin mooshina laguma keenin marka siduu ku soo galay garanmaynee isna meesha ha laga saaro, Xeerka Shaqaaluhu waa mid muhiima, Wax ka badalka Xeerka Nidaamka Garsoorku waa xeer u baahan in muhiimad la siiiyo, Xeerka Guud ee Doorashooyinku sidaan arkayo waxaa la rabaa in

afar xeer oo hore u jiray isagoon wax ka badal aanu ka muuqan in afarta Xeer ee jiray uu liqo, marka afar xeer baa jire mar hadii aanu wax ka badalna aanu ku qornayn sidoodii bay u jiraan xeerkan la soo abuurayna maaha wax jiree sharciga ha loo eego oo sharciga ha lagu dabaqo, Xeerar hore u jiray oo lagu shaqeeyay, cidna lagu xukumay anigu uma arki karo xeer cusub oo aan wax ka badal ahayan baa isku liqaya, codbixiyayaashii baa ku jira, Markaa Xeerka Mugdi baa ku jiree sharci ha loo eego.

Xeerka Sahminta Shidaalka iyo saami-qaybsiga wixii ka soo baxa anigu waxaan leeyahay 9m2 baynu ku heshiin la'nahaye badbaynu ku jirna oo shidaalna ku heshiin mayno hadaynu 9m2 oo biyo ku heshiin waynaye ilaa hada waxaynu sugaynaa Gudoomiye heshiiskii Shirkadaha la-lagalay oo xukuumada ka baryaynaa, waxaynu islahayn xukuumadani sidii ay soo qorteen inay tahay xukuumad sharciga saraysiinaysa laakiin halkii kuwii hore ayay martay, anigoo magaca Gudidda ku hadlayana waxaan leeyahay waa in laga codsado oo ay keenan horta heshiisyadaad shirkadaha la-lagalay.

Xeerka Bangiyada Ganacsiga ceebay inagu tahay, halkaasuuna ka cadeeyay Gudoomiyihii Bangigu siday ugu xaniban yihiin markaa Xeerka ha lagu soo daro ajandaha, maaha in wax walba cid loo xidho sidii ninkaasi sheegayay wadanku afar nin buu xidhan, meel walba cid baa loo xidhay wixii ka dhacayna waynu ogayna afar nin buu xidhan yahay oo dawladnimada sheeganaya.

**Md. Cali Maxamed Aadam (Calibarre):-** Shir-gudoonka, Xildhibaanada, Shaqaalaha iyo Saxaafada iyo Marti sharafta waan idin salaamayaa, Mudane Gudoomiye Ajandaha ina horyaala horta anigu waan soo koobayaa oo dhowr qodob meesha in laga saaro baan qabaa, Xeerka ku qoran qodobka 14 ee ah Maydhista lacagta Xeerkaas magaca ku qoran iyo waxa nuxurkiisa ku jira is-male, Xeerka waa inaynu akhrinaa hadaynaan akhriyin nuxurka uu xambaarsan yahay, wax tarkiisaaiyo faa'idadiisa iyo dhibaarada uu leeyahay garanmayno, magaciisuna waa magc u yaal, wax lacag la maydho oo la mamnuuco, lacagta madaw oo la maydho maraykankaa keena isagaana hada leh ha la mamnuuco oo Xeerkan qoladaasa wadata, lacag la maydhayo ama la diidan yahay maydhisteedana nuxurka Xeerka kuma qornee, waxaa ku qoran wax kale, wuxuu ka hadlayaa Zaad, E-dahab iyo Prepaidka aynu ku shubano, wuxuu ka hadlaya lacagta electronicga la isugu diro, kuwaasina lacag la maydhayo maaha waana khaldaadka ku jira xeerka, Marka horta Xeerkaas Meesha ha laga saaro.

Xeerka Shaqaalaha Baarlamaanka, Xeer-hoosaadkii labada Gole kuwada shaqayn lahaayeen baa la diidan yahay ilaa iminka in la sameeyo, hadaan Baarlamaankiiba aan Xeer-hoosaad lahayn maxaa shaqaale Xeer loogu samaynayaa, taasina khaladaadka aynu ku jirno ayay ka mid tahay, maanta Xeer-hoosaadkii Golaha Wakiilada kawada hadli mayno oo inta inoo hadhay sidaasaynu ku wadane ha lagu soo daro baan soo Jeedinaya Xeer-hoosaadkii Baarlamaanka, wax alaale waxaynu ku wada shaqayno, si aynu u kala

baxno, sidaynu u kala leenahay xaq iyo sidaynu Xeerarka isugu gudbinayno, hada Guurtidii baa Xeerarakii inagu haysata iyo Shaqdeenii, dastuurkii baa qodobo laga badalay oo editingareeyay, Marka Xeer-hoosaadkii Baarlamaanka ha lagu soo daro kan shaqaaluhuna ha ku jiro oo marka la sameeyo ayaa isna la samayn karaaye.

Labadaaas qodob sidaas u soo jeediyay, waxa kale waxaan u kala horeysiinaya sidan:-

- Qiimeynta xaalada guud ee dalka:- anigu odhan maayo xog-ogaal u noqoshada xaalada dalka ee xog ogaal baynu nahaye waa Qiimeynta Xaalada dalka inaynu qiimayno. ***(Seconded).***
- **Dastuurka in la furo:-** maxaynu ka hadalnaa Xeerar iyo doorasho geesahaynu iskula jirnaaye horta waa in Dastuurka la furaa si loo kala baxo, markaa Dastuurka in la furo ayaan qodobka labaad ka dhigayaa, labadaas qodob aynu ku ekaano. ***(Seconded).***

**Md. Ibraahim Jaamac Cali (Rayte):-** Mudane Gudoomiye, Mudanayaal salaam ka bacdi waxaan jecelahay inaan halka ka idhaahod dhowr kalmadood oo ku saabsan ajandahan ina horyaal, tilmaamtayda ugu horaysaa waa in Marka Xeerarka Ajandaha lagu soo qorayo waxaa ila quman in loo soo kala horaysiiyo siday u kala degdegsan yihiin, u kala muhiimsan yihiin ama alphabetic order loo raaco qaab.

Xeerka Xawaaladaha iyo Xeerka Maydhista Lacagta labadaas Xeerba waxay sidooda uga mid yihiin by nature hawlaha Bangiga Ganacsiga waxayna galayaan Xeerka Bangiyada Ganacsiga wayna adag tahay in la sameeyo Xeerarkaas ka Bangiyada Ganacsiga oo aan jirin waayo maba jiro haykalkii guud ee sharci ee institution ee lagu fulin lahaa. Arrinta labaad, Qiimeynta Xaalada wadciga guud ee dalka ayaynu nidhi aynu ka hadalno, xaalada dalka ee adag waxaa ka mid ah qalalaase dhaqaale ama lacageed sababta ka dambeysa ee arrintaasi salka ku haysaana waa maqnaashaha Xeerkii Maamulka Baangiyada Ganacsiga, Markaa Waxaan qabaa oo aan soo jeedinayaa in Xeerka Bangiyada Ganacsiga in Ajandaha lagu soo daro oo uu aad muhiim u yahay labadaas Xeerna ay qayb ka mid ah noqdaan Xeerka Bangiyada Ganacsiga.

Xeerka Shaqaalaha Baarlamaanka, waxaan qabaa mid meesha ku jira maaha, shaqaalaha Baarlamanku waa shaqaale Dawladeeda, shaqaalaha Garsoorku waa shaqaale dawladeed, shaqaalaha dawladuna waa mid, dawladuna waa mid uun, dawlada waaxaha waxay ugu kala qaybsan tahay shaqo ahaan saddex waaxood, laakiin dawlad ahaan mid uun one state, dawladaasina shaqaale kaliyay leedahay waxayna leeyihiin xeer kaliya, shaqaalaha Baarlamaanka sida loo maamulayo waxaa tilmaamaya Qodobka 52aad farqadiisa 3aad ee Dastuurka, dastuurkuna in Xeer gaar ah loo sameeyo ma sheegayee wuxuu tilmaamayaa in Xeer-hoosaadka Golaha lagu maamulo, laakiin wixii shaqaalenimo ah waxay la wadaagaana Xeerka shaqaalaha ha ka shaqeeyeen garsoorka

ama baarlamaanka ama hay'ad kale oo Dawlada meeshay doonaan ha ka shaqeeyaan ee waa isku mid shaqaalahasi, markaa waxaan qabaa in meesha laga saaro, mana ah in wakhti lagu lumiyo oo meesha kuma jiro. Xeer-hoosaadka Golaha, Waxaan qabaa in Xeer-hoosaadkii Golaha la soo nooleeyo si shaqada Goluhu u soo noolaato.

Xeerka Saxaafada, Xeerkaasi mudo ayuu inala yaalay, anigu dadkii ka soo shaqeeyay ee wax ka soo diyaariyay baan ka mid ahaa, asal ahaan Xeer aad u wanaagsan oo Xeerarka Caalamiga ah la jaanqaadaya ayuu ahaa, Xeer kaliya muu ahayne laba Xeer oo kala ah Xeerka Saxaafada iyo Xeerka Warbaahinta ayuu kala ahaa, aduunyadana laba qaybood oo inagu saxaafad baynu nidhaahnaa, waana broadcasting Act iyo Media Law oo kala ahaayeen, gacmo badan buu isagu gudbay oo siduu Golaha ugu soo noqday garanmaye waxaan ogaa isagoo Wasaarada Warfaafintu gacanta ku haysay, Xeerkuna mar haduu Golaha ka curto ama Golaha yimaado waa sharci daro inuu Golaha dibada uga baxo isagoo sharciya oo la ansixiyay ah mooyaane, Xeerarkeena iyadoo Gudiyadu gacanta ku hayaan oo shaqadiisii socoto uu ka baxo Golaha ayaa dhacda sida Xeerkan Saxaafada, Xeerkii Argagaxisada oo xataa Gudidda Arrimaha Gudaha oo gacanta ku haysay iyadoon ogayn ay cid kale hada dibada ku hayso, cidii wax ku daraysa waxay ahayd inay gudidda iyo halkan keenaan ilayn wada tashi baa la samaynayaaye, laakiin waa in aanay dibada uga bixin Golaha.

Gudoomiye anigu intaas ayaan ku soo koobayaa, laakiin waxaan ku noqonayaa arrintii ajandaha sida loo soo dhigayo, waxaana qabaa in cid ajandaha soo dhigaysaa ay ka balaadhnato shir-gudoonka oo ay fiican tahay in Xildhibaanada iyo ay noqdaan involved oo marka la diyaarinayo ay ka qayb noqdaan ama Gudidda Joogtada ah ha ka qaybgasho ama Gudida Shaqada ee Gudoomiyayaasha Gudiyada iyo Shir-gudoonku ku midaysnaayeen ha noqdaan ama Ad hoc committee ha lagu attachedgareeyo, Markaa waxaan soo jeedinayaa in diyaarinta Ajandaha laga balaadhiyo inta uu hada ku kooban yahay.

**Md. Xuseen Axmed Caydiid:-**Gudomiyaha, Xubnaha Golaha Wakiilada, Xoghaynta iyo Saxaafadaba waan salaamayaa ASC, anigu waan ku cusbahay Golaha inkasto aan rag badan golihii hore ku soo wada jirnay ama siyaaasada kuwada jirnay midba dhinac ka hayay oo badi la isyaqaan hadana hawsha Goluhu saaka waa kow waxaana rajaynayaa inaan ana dhinacayga ka qaato hawsha oo wadashaqayn wacan noqoto insha'alahu.

Waa laga wada hadlay oo talooyin qiimo leh baa ajandaha la iga yidhi waxaana ku horaynayaa oo ku raacayaa arrin laga wada hadlay oo ah Qiimeynta Xaalada Dalka waana ku seconded in xaalada dalka la qiimeeyo iyo siyaasin halku dalku sugan yahay iyo dhaqaalaha iyo nabadgalyada aad baan u adkaynayaa in goluhu wax ka soo saaro.

Xisaab xidh baa ku qoran Golaha wakhtigiisii waa gabo-gabo oo wax yar baa inoo hadhay, hadaan xisaab xidhadii hadhsanaa aan meel lagu tiirin dee hawl ku baaqatay Golihii oo isagoon ka go'aan gaadhin wakhtigii ka dhamaaday bay noqonaysaa markaa xisaab xidhkaa rag badan oo soo jeediyay in laga saaro anigu waan ka duwanahay oo waxaan leeyahay xisaab xidhadaa in la keeno oo Goluhu waajibkiisii uu ka guto.

Xeerarka Doorashooyinka waxay ahaayeen Xeerar jira, halkana waxaa isku raran Xeerarkii doorashooyinka iyo Diiwaangalinta oo waxaa la yidhi Xeerka guud ee Doorashooyinka iyo Diiwaangalinta, manuu jirin Xeer guud oo waxaas oo dhan kawada hadlaya hadaan iminka la wadin, waxaana qabaa dee hadii hawlihii hore Golahani u ansixiyay ee lagu shaqaynayay aanay Xeerkale inooga baahnayn dee wakhtiguun inaga ridayaane wixii korodhsiimo ama kaabis ama wax laga badalayo ayaa la samayn karaa, hadii la isku darayona Xeerarku iyagoo sidooda u wada qoran baa nin waliba buug ka dhiganayaa oo meel dhiganayaa oo dhib maaha horena waynu ugu dhaqmaynay, Xeerkana ha la hubsado wixii wax ka badal iyo kaabis ee la soo jeediyayna si mug leh ha loo eego.

Xeerarka Maamulka Gobolada iyo Degmooyinka wax badan baa ka qabyo ahaa sidaan ogaa, hadii dee waxaasi wax dhaqaaqi waayay oo wax ka badal u baahan ay tahay in la eego waan soo jeedinayaa oo waa muhiim, Xeerka Saafada mudanayaal badan oo soo jeediyay in meesha laga saaro oo u dhigay inuu soo kordhin doon waxyaabo cabudhaad ah, marka hore dastuurka ayaa tixraac inoo ah dastuurkuna madax banaani buu siiyay Saxaafada iyadoo taas laga duulyo baa saxaafada Xeer loo samaynayaa, Xeerkii hore ee jiray wuxuu ahaa Xeer fasaxaya in ninka saxafiga ah lagu qaado dambi ciqaabeed, waan ka duwanahay Xildhibaanadii soo jeediyay in aanu dhigayn dambi ciqaabeed ee uu dhigayo magdhow ma jirto taasina erayga magdhow Xeerkaasi soo qaadi maayo Qodobadiisana waxaa ka mid ah nin wariye ah waxaa la xidhi karaa marka waaran loo jaro oo kaliya, hadii waaran maxkamadeed loo soo goynayo soo Xeerkii muu fasixin, markaa Xeerkii baa fasaxay in la xidhayo, waxaan leeyahay halka inagoo dastuurka iyo madax banaanida u gayna ha loo badalo qaabkii civil liabilityga ahayd ama nidaamkii madaniga ah oo xeerkaas aanu waxba  ka qorayn oo hadii nin wariyaha ahaa qof kale oo muwaadin ah meel kaga dhaca sharaftiis inuu ku oogi karo qodob ah magdhow ah ha lagaliyo meesha iyadoo culayska hadba dambigu leeyahay loo eegayo, markaa waxaan qabaa xeerkii aynu u rogno mid ku salaysan civil liability qaab madaniga ah oo dib u celinta aynu ka dayno Xeerkaas.

Shaqooyin badan oo cusub baa jira, ma waxa wanaagsan inay sharci la'aan ku socdaan, mise waxa wanaagsan in sharci loo raaco? Matalan, sahmintii shidaalku way socotaa, soo saaristiisii baa lagu socdaa, sahminta sharci la aanta ku socota in sharci loo helo oo loo raaco iyo in bilaa sharci lagu socdo dee aniga in sharcigii loo raaci lahaa la helo ayaa

wanaagsan baan qabaa, marakaa waxaan soo jeedinayaa inagu celinta aynu ka dayno kaasna isna sidiisa ha u yimaado.

Xeerka Nidaamka Garsoorka oo aan la soo qaadin oo laba xeer oo kala jaad qof walbaa u kuu doono adeegsado ayaan iska ku darayaa oo xeerkaasna kal-fadhigan ha la soo galiyo insha'alaah oo xeerarka laga hadlayo aynu ee xaga hore aynu ka dhigno.

Xeerka Shaqaalaha waxaan ku raacsanahay Xildhibaankii iga horeeyay inay shaqaale Daawladeed yihiin nidaamkii lagu maamuli lahaana aynu Xeer-hoosaadka ku balaadhino waayo wixii xuquuq iyo grades ahna waxay kala siman yihiin shaqaalaha Dawlada sidaas dastuurku tilmaamayna xaga maamulka Xeer-hoosaadka lagu jideeyo ayaan soo jeedinayaa.

Waxaan kaga baxayaa, Xeerarkii hore ee hadhay hadii ay jireen oo kal-fadhigii doodoodii dhamaatay ee codka sugaya sida saaxada ka muuqata iyagana codkoodii ha la galiyo si kuwa kale siday u kala culus yihiin sida doorashooyinka iyo aynu galno, WSC.

**Md. Ibraahim Mahdi Buubaa:-** ugu horeyn waan idin salaamayaa dhamaan Gudoonka, Mudanayaasha, Shaqaalaha iyo Saxaafadaba, Mudane Gudoomiye horta waxaan doonayaa fadhigan markaad gudoominayso mudanayaashu ilaa intaad Golaha ka xidhayso in aanay rawixin, waayo waxaynu arkaynaa in Golihii faaruqayo markaa maxaad maamulaysaa Gudoomiye waa in aanay Mudanayaashu kicin iyagoon amar kaa qaadan wixii aad fasixi kartaana noqdaan xubin ama laba.

Ajandaha hadaan u soo noqdo sida xildhibaanadii iga horeeyay sheegeen ha loogu horeysiiyo xaalada siyaasadeed ee dalku marayo guud ha la yidhaahdo xog-ogaal u noqonasho ama qiimayn waa isku mide heerka ay Somaliland marayso gudo iyo dibadba oo Mudanayaashu dood ka yeeshaan go'aamano ka soo saarno, waxaynu ognahay Dawlada Somaliya culays siyaasadeed oo aan hore u jirin inay maanta Somaliland saartay, waxaynu ka warhayna xaalada nabadgalyo ee bariga afrika,oo aynu ka mid nahay, waxaynu ognahay heshiisyo caalamiya oo aynu dawlad ahaan galnay ilaa hadana wax iska badalay iyo wax ka dhaqaaqay aanay jirin, waxaas oo dhami waxay u baahan yihiin Goluhu dib u-eego oo dood dheer laga galo, dastuurkuna wuxuu jidaynayaa in G/Wakiiladu siyaasada dalka ay xukuumad kasta ku maamulayso uu hago oo ku ilaaliyo shuruucda iyo qawaaniinta gaar ahaan heshiisyada iyo arrimaha dibada ee iskaashiyada caalamiga ah.

Sidaa darteed Maanta dalku wuxuu ku sugan yahay xaalad ka duwan xaaladihii hore ka duwan, waxaynu la soconayaa in dawlada somaliya maalmihii u dambaysay ay beesha caalamka kala hadlaysay in deeqihii ama dhaqaalihii la inna siin jiray ay joojiyaan iyadoo

dhaqaalihii culays badani fuulay, waxaynu ognahay in Wada-hadaladii Somaliya iyo Somaliland uu hakaday isla markaana dawlada somaliya dib ugu dhawaaqayso in la bilaabo wada hadaldii, 2012kii aynu fasaxnay oo Golahan looga codeeyay mar labaad maanta wada-hadaladii aynu fasaxnay maxaa ka qabsoomay, maxaynuse ka faa'iidnay dariiqu haystaase waa xagee ma yahay kii saxsanaa inaynu qiimayno oo dib u eegis ku samayno ayaa loo baahan yahay, marka qodobka kowaad ha noqdo xaalada siyaasadeed ee dalku marayo.

15 xeer ayaa inoo qoran, markaynu runta hadalno kal-fadhigan waxaynu dhamayn karaa 7 ama 8 xeer, maaha inaynu ajandaha iska soo qorno qodobo fara badan oo aynaan dhamaynayn iska soo darno, waxaan u soo u kala horaysiinayaa siday u kala muhiimsan yihiin ee aniga iila tahay inaynu ugu soo horaysiino Mooshinada, waxaa ajandaha ku jira laba mooshin waana Mooshinka wax ka badalka Xeerka Kaluumasiga oo kal-fadhigii hore golaha la keenay waxana soo jeedinayaa inuu noqdo xeerka ugu horeeya waana sharci sida xeer-hoosaadkeenu dhigayo in hadii mooshin la keeno aan wax kale laga horeyasiin Karin, waxaana ku darayaa in wax ka badalkaas Xeerka kaluumaysigu uu dhamaystiran yahay mudanayaashii mooshinka ku keenayna ay daraasad badan ku soo sameeyeen soona akhriyeen wax ka badal badana ku soo sameeyeen Xeerka hore oo ahaa 1995kii wakhtiguu soo baxay ka faa'idaysiga iyo khayraadka badana aan wax badan ka sheegaynin xeerkusa yahay xeer balaadhan oo loo baahan yahay bulshadu inay ka faa'iido sida khayraadka looga faa'idaysanayo.

Sidoo kale Mooshinka hore ee Wax ka badalka Xeerka Gobolada iyo Degmooyinka oo Gudidda Arrimaha Gudaha loo dhiibay maaha inay kal-fadhii iyo mid labaad haysato waayo waa inay kal-fadhiga gudihiisa ku soo celisaa, marka waxaan leeyahay Mooshinka Xeerkaas Goboladu waa inuu noqdaa Xeerka labaad ee aynu guda galayno.

Xisaab xidhada ayaan ka saddexaad ka dhigayaa oo iyagana waa loo baahan yahay, halka qodobka afraad waxaan ka dhigi lahaa oo aad u muhiima Xeer saddexdii kal-fadhi ee kan ka horeeyaya ku jiray halkana aan ka muuqan oo ah Xeerka Ganacsiga Baananka oo ah muhiim isla markaana laba xeer oo halkan ku jira aan la'aantiisa la samayn karayn kuwaas oo ah Xeerka Xawaaladaha iyo Xeerka Maydhista lacagta labaadisba hadaan Xeerka Ganacsiga Baananka, markaa inta labadaas laga saaro lagu badalo oo qodobka shanaad laga dhigo Xeerka Ganacsiga Bangiyada.

Qodobka lixaad Xeerka Shaqaalaha Baarlamaanka, anigu Garyaqaan Rayte lama qabo in shaqaalaha Baarlamaanku ay la mid yihiin Shaqaalaha Dawlada ee kale waxaan aaminsahay in shaqaalaha Baarlamaanku yihiin kuwo ka madax banaan shaqalaha xukuumada waayo Baarlamaanku waa Waax gaar ah sidaa darteed haduu waax gaar ah yahay wuxuu yeelanayaa Xeerar gaar ah oo ku maamulo shaqaalihiisa iyo nidaamkiisa

habraaca sharci ee kula shaqeeyaan Golayaasha kale ee Qaranka iyo waaxaha jira, sidaa darteed waa waajib in la sameeyo Xeerka shaqaalaha Baarlamaanka waayo waxay hayaan sir culus iyo dukumentiyo aan loo baahnayn inay u gudbaan cid kale markaa in xeer gaar oo ku shaqeeyan yeeshaan oo xaqooda siinaya iyagana qabanaya, markaa qodobka lixaad ee ajandaha ayaan ka dhigayaa.

Qodobka todobaad, waxaa la inoo keenay oo ay Xukuumadu isku soo dartay Xeerarkii Doorashooyinka iyo Diiwaangalinta Qaranka iyadoo xeer hore jiraan, markaa Xeerarkaas jiray siday isugu soo dartay inay sharciga waafaqsan yihiin iyo in aanay waafaqsanayn iyo siday kootada u soo dhigtay waxaynu hubsan doona markaynu galno Xeerkaas, hadii dastuurka in la-furo loo baahdona la furo sida Calibarre sheegayay in xeerkaasi dhaqaaqi Karin ilaa dastuurka la furo sida Madaxweynuhuba soo jeediyay waan la qabaa, waana in qodobka todobaad laga dhigaa ajandaha.

Kan sideedaad, Wax ka badalka Xeerka Nidaamka Garsoorka waa muhiim waayo waxaynu ku dhaqanaa penal cod wax la yidhaahdo, wax ka badal lagu sameeyay laba jeer buu xeerkaasi Golaha ka baxay Xukuumadihii hore ayaa labada jeerba soo celiyay, sababta ay u soo celin jireena waxay la xidhaadhaa awoodaha uu xukuumada siinayo panal code-ku oo xuquuqdii umada iyo dadkii maalgashadayaasha ahaaba uu meel ka dhac ku yahay Xeerkaas panel code-kusidaa darteed ay xukuumadahaasi u jeclaysan jireen inuu xeerkasi shaqeeyo oo Xeerka Nidaamka Garsoorka ay ka hor-iman jireen, Xuseen Axmed Caydiid ka mid buu ahaa laftigiisu oo Golaha Wasiirada ka mid ahaa, markaa Xeerkan waa inuu ku jiraa Ajandaha Kal-fadhigan isla markaana cod aqlbiyad ah loo raadiyaa si aanay Xukuumadu u soo celin Karin, Golaha Guurtiduna aanay waxba uga soo badali Karin taas oo Madaxweynaha ku khasbaysa inuu sidaa ku saxeexo.

Xeerka Ilaalada Xeebaha ayaan ku soo gabo-gabaynaa si kal-fadhigan 9 xeer u galna, waxaynu ognahay in Xeebaha Somaliland fawdo badani ka jirto, tahriibta ka sokow waxaynu la soconaaa in khayraadkii bada lagu hayo faro baas oo iyadoo cidna aan lagala gabanayn ay maraakiib shisheeye khayraadkii bada u guranayaan ciidanka ilaalada baduna aanay awood u lahayn, markaa Xeerkaas oo isna muhiima ayaan ku soo gabo-gabaynayaa, waad-mahadsan tihiin.

**Md. Maxamed Cumar Jiir:-** ASC, bacda salaam, hadalka aan ugu horaysiinayaa hadalkii uu yidhi Xildhibaan Buubaa Golaha dee laba saddex shay ayaa muhiima in maamulka la ilaaliyo waxa weeye qof baa hadlaya dadkiina dhagaysan maayaan meesha waxaa lagu shirayaa waxa weeye in lagu kala baxo cod qof waliba fikir buu soo jeediyaa waxa go’aan lagu gaadhi karaa iyadoo la is dhagaysto oo qofkii dhagaysto wixii lagu hadlayo oo si halkii wanaagsan uu u raaco, laakiin qofkii marku hadlu wuu iska tagayaa labadii xildhibaan ee iga horeeyay waxay la hadlayeen dee kuraasi madhan uun oo afar qof baa

jooga hadhow marka la codaynayo qofkii hadaanu wax dhagaysan muxuu u codaynayaa, markaa maamulku xal u samayso oo qof wax muhiima u kacaya mooye aan la iska kicin taasina waa muhiim.

Waxaan la qabaa Xildhibaanadii hadlay fikirka ah war ma gaadhno intaas oo dhan oo ma qaban karno oo kama gaadhsiin karne wax yar oo haboon aynu ka dhigano ajandaha, oo wixii hore loo galay ee aan la dhamayn la soo horaysiiyo oo la dhameeyo si wixii inooga baxaan, laakiin hadii wixii hore oo aan la dhamayn qaar cusub la keeno waa daal la korodhsaday, markaa waxa fiican in hore aynu dhamayno dabadeedna wixii inoo yimaada siday u kala muhiimsan yihiin ay u kala horaysiino.

Waxan oo dhan marka la eego hadba kii la eego inuu muhiim yahay baa la moodaa, laakiin anigu waxaan qabaa wadankeenu wuu wayn yahay, haduu waynyahayna waxaynu dalal badan la qabnaa in caasimada uun had iyo jeer muhiimada la saaro, markaa si dalka wax u wada gaadhaan waa inaynu Gobolada muhiimada kowaad ka dhignaa oo aynu u aragnaa aqlabiyada wadanku Gobolada joogaan, dadka halkan joogaana maaha wax fudud inay had iyo jeer ku noqon karaan Goboladii oo uga warhayn karaan, markaa in Maamulada Gobolada xooga la saaro sidii loo siin lahaa awood ay wax badan ku qaban karaan baan xal u arkaa, anigu intaas ayaan ku soo koobayaa. Waan mahadsan tihiin.

**Xidhitaankii (adjourned) 11:53 AM**
**Gudoomiyaha:-** aad baad u mahadsan tahay Xildhibaan Maxamed, maanta oo aynu shaqo muhiima qabanayna intiina u dhabar adaygtay waan u mahadnaqayaa, Buubaa siduu soo jeediyayna waa loo baahan yahay in aan la iska bixine wax la soo jeedinayo la dhagaysto afarta xildhibaan ee u dambeeya aanay gidaarada uun la hadlin, waxaan xoghaynta farayaa inay isku habeeyaan oo fadhiga sabtida u codayno ajandaha, fadhigu sidaasu ku xidhan yahay, waanad mahadsan tihiin.

| | |
|---|---|
| **Cawad Cali Maxamed** | **C/risaaq Siciid Ayaanle** |
| **Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka G/Wakiilada** | **Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSI** |
| ------------------------------------------------ | ---------------------------------------- |